# TAXANAHA DHAXALREEB III/2005

Diisember 2005 Ponte Invisibile Ed.

## Mahadhadii Muuse Xaaji Ismaaciil Galaal



Lee Nichols, right, with late Somali author Musa Galaal

©Lee Nickols

Cabdiraxmaan Faarax "Barwaaqo"

**Xuquuqda qoraalkan oo dhammi waxay u dhawran tahay qoraaga kor ku magacaaban oo laga xidhiidhi karo hal_aqoon@yahoo.com.**

PONTE INVISIBILE

Buug elektrooniggan waxaa daabcay Ponte Invisibile Edizioni, REDSEA-ONLINE.COM Publishing Group
Diisember 2005 – daabaciddii 1aad - Pisa

Taxanaha *Dhaxalreeb*:
[1] Jama Musse Jama, Juun 2005
*Layli Robot: Makiinad iswadda oo ciyaarta Layli Goobalay*.

[2] Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo' iyo Mohamoud H. Nugidoon, Noofember 2005
*Qalabka iyo Suugaanta Qodaalka*.

[3] Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo', Diisember 2005
*Mahadhadii Muuse Xaaji Ismaaciil Galaal*.

Taxanaha *Dhaxalreeb* waa qoraallo aan kalgal sugan lahayn oo sannadkiiba dhowr jeer kasoo baxa degelka redsea-online.com. Waxaa isku dubbarida qoraalladaas Jama Musse Jama, waxaana daabacda shirkadda buugaagta soo saarta ee Ponte Invisibile Ed. ee saldhiggeedu yahay Pisa, Italy.

Bilaash kaga soo rogo degelka www.redsea-online.com/e-books.

# Mahadhadii Muuse Xaaji Ismaaciil Galaal[1]

*Cabdiraxmaan Faarax "Barwaaqo"*

*hal_aqoon@yahoo.com*




©Lee Nickols

Muuse Xaaji Ismaaciil oo dadka badankiisu u yiqiin "*Muuse Galaal*" waxa uu ku dhashay degmada *Cayn* ee gobolka Togdheer. In kasta oon la aqoon xilligii uu dhashay, haddana qoraal kooban oo uu *Prof. B. W. Andrzejewski* kaga hadlayey mahadhadii Abwaanka[1] waxa uu ku sheegey in uu Abwaanku dhashay 1920kii. 1980kii ayuu Abwaanku ku geeriyoodey gegida dayuuradaha ee magaalada *Jidda* ee dalka Sucuudi Areebiya, isaga oo loo  wado dalka Talyaaniga si loogu soo daweeyo.

Yaraantiisii, Muuse, waxa uu ku kacaamay miyaga gobolka Togdheer. Halkaasi oo uu Quraanka iyo dhaqankaba si xoog leh ugu bartay. Barbaarnimadiisii waxa uu ku biiray ciidammadii Ingiriiska ee Soomaalilaand. Waxana waxbarasho loogu diray magaalada *Neyroobi* ee dalka Kiiniya. Kadib waxa uu waxbarasho u aaday dalka Ingiriiska.

Dagaalkii labaad ee Adduunka ayuu noqday madaxa waxbarashada ciidammadii la odhan jirey *Somali Scout*. Kadib waxa uu noqday madaxa qormaha ee idaacadda Raadyow Hargeysa oo waagaa la odhan jirey *Radio Somali*. Wax yar kadib waxa uu ku biiray wasaaraddii waxbarashada ee Soomaalilaand. Waxaanu madax ka noqday qaybta waxbarashada dadka waaweyn. Markii gobannimada la qaatay, waxa uu noqday guddoomiyihii guddidii loo xilsaaray qoridda af Soomaaliga. Waxa uu bare ka noqday dugsigii tababarka macallimiinta ee *Lafoole*. Waxa kale uu suugaanta iyo dhaqanka ka dhigijirey Jaamacaddii Ummadda Soomaaliyeed. Kolkii u danbeysey waxa uu Xeel-dheere dhaqanka iyo suugaanta ah ka ahaa Akaddeemiyihii Dhaqanka iyo Suugaanta Soomaaliyeed. Waxa kale oo uu ahaa la taliyaha Wakaaladda Horumarinta Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa. Waxa kale oo uu xubin buuxda ka ahaa guddida dib u qoridda mahadhada Afrika.

Muuse, Alla ha u naxariistee, waxa uu ahaa hal-abuur waxaanu sameeyey ugu yaraan shan riwaadood. Riwaayadihiisa waxa ka mid ahayd riwaayadda la odhan jirey "*Qayb libaax*". Taasi oo noqotay riwaayaddii u horreysey ee idaacad Soomaaliyeed laga sii daayo (*Radio Hargeysa*) . Riwayaddaasi oo ay dadku aad u jeclaysteen awgeed ayey dhambaalladii hambalyada ahaa iyo kuwii lagu soo codsanayeyba kala go'i waayeen. Arrinkaasina shaki weyn ayuu ku abuuray maammulkii Dawladda Ingiriiska, kaasi oo isna go'aamiyey in riwayaaddaasi la joojiyo.



Raadiyow Hargeysa oo madfacku dhacay

[1] Qoraalkani wuxu  hore ugu soo baxay  warsidaha Hal-aqoon ( Xidhmada 1aad,  tirsiga 2aad, Jiilaal 2000   /  Vol.1, No. 2, Winter 2000)

Maansooyinka uu Abwaanku curiyey oo gaadhaya kontameeyo waxa ka mid ah maansada la yidhaa *"Hengel"* oo la duubay 1952kii kuna kaydsan qolka kaydka Jaamacadda *"School of Oriental and African Studies*." Abwaanku waxa kale oo uu ahaa qoraa. Waxaanu qoray buugaag farabadan oo uu ka mid yahay buugga la yidhaa *"Xikmad Soomaali"*, kaasi oo soobaxay 1956kii. Waxa kale oo uu qoray buugga ladhkiisu yahay *"Qaalle Adduun"*, oo soo baxay 1953kii. Dheeg buuggaas ka midana waxa la dhigay Muusamka dalka Ingiriiska (*British Museum*).

Dhanka afka Ingiriiska waxa uu ku qoray buugga la yidhaa*"Stars, Seasons and Weather in Somali Pastoral Tradition" iyo ka kale ee la yidhaa "An Anthology of Somali Oral Literature." Qoraallo badan oo kalana waxa ay wada qoreen Prof.B.W. Andrzejewski.*

Mar uu Abwaanku u warramayey ninka la yidhaa *Lee Nichols* oo ka tirsan idaacadda Voice of America oo kolkaa diyaarinayey buugga la yidhaa *"Conversations with African writers" oo* soobaxay 1980kii, wuxuu u sheegey inuu aad isugu hawlijirey ururinta suugaanta aan weli la qorin ee ku dhex filiqsan dadka reerguuraaga ah. Wuxuu intaa ugu daray inuu ururiyey ugu yaraan 500 oo cajaladood. Isaga oo hadalkiisii wata waxa uu Abwaanku yidhi,"Maalmaha qaarkood ayaan u imaaddaa carruurtayda oo ku ciyaaraysa cajaladihii oo baabuur ka dhiganaysa !! "

Muuse Galaal, Eebbe ha u naxariistee, waxa uu ahaa nin bulshaawiya aadna u kaftan iyo xifaalaba badan. Dhallinyarada wuxuu had iyo jeer ku boorrin jirey kuna tirtirsiyijirey iney bartaan dhaqankooda iyo hiddahooda. Waxaanu uga digijirey u hanqaltaagidda dhaqammada shisheeye. Mar uu la kaftamayey dhallinyaro meel isugu timid oo uu ka mid ahaa, Alla ha u naxariistee, *Cabdisalaan Xaaji Aadan* waxa uu ku yidhi, *"Ragna waa raggii hore, hadalna waa intuu yidhi"* Aragtidaa ayaa dood kulul ka dhex aloostay dhallintii madasha fadhidey. Ugu dambayntiina Muuse wuxuu kaftankiisii ku soo af jaray, "Waar maydinkaa tirin kara gabaygii uu *Ismaacill Mire* lahaa :

*Annagoo Taleex naal jihaad taladi soo qaadnay*
*Toddobaatan boqol oo darwiish togatey neef doora*
*Sayidkaygu tii uu na yidhi Torog ku heensaynay*
*Shakadaha intuu noo tebbedey noogu tacab qaybi*
*Ilaahay ha tabantaabiyee ducada noo tuumi*
*Wareegada rag baa waxay teweli yaan wax kaa tegine.*
*Annana tawlka qaalmaha nin iyo tulud u soo saarray*
*Sibraar caano geel loo tabcaday Talax ku sii maallay*
*Tiirkii Rasuulkiyo sharciga toog ku wada fuullay*
*Galabtaa taxaabiyo kadlaba toobiyaha qaadnay*
*Habeenkii fardaha waw tudhnaye taag ku sii mirannay*
*Tun biciida lagu qoofatyow xamashka loo taabev*
*Talaaduhu markii ay dhaceen teleley oo reemay*
*Tixda gabay markii aan akhriyey toose niman jiifey*
*Tiraabkaygu meeshuu ka baxay la isku soo toomi*
*Salaaddii rnarkii aan tukanney yaarka kaga teednay*
*Togga Ulasameed dooyadii horay u tuuryaynay*
*Intay Timacad noo soo arkeen marada noo taage*
*Annaguna jahaad kama tagnee tiimbad ugu roorray*
*Sengeyaal tabaadey iyo gool weerarka u tooxnay*

*Tiiraanyo ololkii dhulkii Taani naga qaadday*
*Tollaayeyda qaylada Berbera tahan la weydaari*
*Taambuugleyaashii iyo kuway tebeysey soo gaadhe*
*Taysaha gu'gii oo han qadhay tininigtii yeedhay*
*Talo-xumada awrtuu u xidhay baqe taraarsiinnay*
*Gidhligaanku meeshuu turqaday laga tunsii geela*
*Tirsan maayo uunkii tirmiyo tulushle iiddoore*
*Turjubaannadii iyo halkaa koo fil lagu toogay !*
*Gaaladu waxay tacab lahayd taabnay galabtaase*
*Maadhiin turaabtaa ka badan tuurta kaga qaadnay*
*Tukihii intaan niman u wadhay tobanle soo qaatay*
*Gebagebo u tooxnoo kufriga Maarre kaga teedney*
*Tafwareeman mayne intaan tubay ku aynshaadey*
*Galabtaa carraabaha ku timid turugga Buuhoodle*
*Habeenkaa ninkii tamar lahaa tarantarree gaadhka*
*Habeen kale Tagaabeeye iyo tu'innay Hayllaawe*
*Habeen kale Taxaasheey Nugaal godan u tuuyaynay*
*Habeen kalena tuuraha Cadduur toolin kaga maallay*
*Habeen kale Dariiqada tubnoo Toosan lagu qaybsey*
*Toban gool tabaadiga dhigiyo toban unuun-gooyo*
*Iyo toban tiftii hore rimoo taani lagu qooqshey*
*Iyo tobon abeer tawllanoo tixinka qaalmooda*
*Iyo toban irmaanoo aniga laygu taageeray*
*Iyo taan eryoon jirey markay tubantahee joogto*
*Been laguma tookhiyo afaan taabud noqonayne*
*Intaa xarunta waa tubay xaq waa lagu tanaadaaye*
*Warka Tuurre waa laga hayaa tan iyo Iimey e*
*Suldaan Ruunna loo tebi inuu tuuladii gubaye*
*Waa Xamar tarrara oo misana taab ku sii daraye*
*Taltallaabsigiisiyo kabtiga tabo kalaw dheere*

*Cabdisalaan* oo arrintaa ka warcelinaya ayaa isna si kaftana u curiyey maansada caanka noqotay ee la yidhaa *"Togga Herer"* isaga oo ku hogatusaalaynaya siday xilliyadu u kala duwan yihiin, dhallin kastaana xilligeeda wax ku foogantahay. Waxaanu yidhi:

*Duhurkii toggaa Herer haddaad qado ka soo tuurto*
*Hurdo laguma taamee naftaa lala tacaalaaye*
*Anigiyo toddoba aan ku jirey tumasho soo qaadnay*
*Rag tabaabushuu leeyahee wax istusaalaynay*
*Labo tubaha noo sii cayima hore u sii tuurray*
*Ayana tusmada warkay noo sideen nooga tibixsiiye*
*Togwajaale qaadkii ka yimid tacab u soo miidhnay*
*Markay laba tobnaad noo xidheen toobiyaha qaadnay*
*Tagsi lagama maarmee nin wadey suuqa nagu tooci*
*Tilmaan-quruxsan goobtay fadhidey saani ugu toosnay*
*Tubtii horeba boqol jaa'ifa ah teybalka u saarray*
*Barkimooyinkii teedsanaa suxul ku taageerray*
*Nin waliba halkuu soo turqaday garabka soo tiiri*
*Isagoo falaas laga tif tiray laysu tebi shaaha*
*Nin waliba tankiisii haraaq tiilley ugu laabnay.*

*Kaftan aan turxaan lagu ogeyn laysku tuurtuurye*
*Laba aad turkiga mooddid oo tikhilka naagooda*
*1yo laba tafiirtii jannada lagu tilmaamaayo*
*Iyo laba wax layskuma tirshee sida tiriiggaasa*
*1yo taan lahaan jirey markaan tumasho soo qaado*
*Intaasoo xarrago tiicaysa oo temeshle luudaysa*
*Oo toobab noo soo xidhay  tal iyo xiisaan leh*
*Oo timaha soo fidhay salaan gacanta noo taage!*
*Annaguna hablaha kama tagnee geerash ugu taagney*
*Heesaha rag baw tamar galee kuwii tiriyey soo qaadnay*
*Alla-tiirigii heesi jirey noogu tacab sawdka*
*Tiiraanyo qayshihii rabaab faraha taabsiiye*
*Kaman talalaxleeyiyo durbaan tininigtii yeedhay*
*Annaguna tustuurtay  lahayd sacabka tiitaynay*
*Goortay cabbaar naga tumeen tegis u qoontayste*
*Sheekadu hablahay noo taxnayd togannay haasaawe*
*Hadal tooxanoo hoos u teyan la isku taataabay*
*Siduu teyse roob nagu onkoday taaha ku caweyney*
*Rag takooran baa nagu jiree tabaha qaar diidnay*
*In kastoy taftuba noo dhoweyd teedka sharaf eegnay*
*Talantaalli labadii gacmood tahan isweydaarte*
*Warmihii tumaatida adkaa tiirka qabadsiinnay*
*Waan taag darreeyaa haddaan taabto geedkabe*
*Habeenkaa ninkii tamar lahaa taxay mirqaankiisa!!*

Abwaanku waxa uu ku alaladijirey inuu arko af  Soomaaliga oo qoran. Arrintaana halgan dheer ayuu u soo maray. *Prof. B. W. Andrzejewski* oo arrintaa kaga hadlay qoraalka  ladhkiisu yahay (*Muuse Xaaji Ismaaciil Galaal: a founding father of written Somali* ) kuna soobaxay warsidaha *"Horn of Africa" xidhimadiisii 4[aad]*tirsigii 2[aad], waxa uu sheegay inuu Abwaanku ka mid ahaa dadkii intii hore rumaysnaa in af Soomaaliga lagu qoro xarfaha afka carabiga. Kolkii uu dareemey iney jiraan dhawaaqyo Soomaaliya oon ku jirin af carabigana wuxuu ku dadaalay inuu makiinad ka mid ah makiinadaha af Carabiga lagu qoro uu wax ka beddelo una sameeyo xarfo tilmaamaya dhawaaqyada Soomaaliga ah een ku jirin af Carabiga. Kolkii uu arrintaa u soo bandhigay bulshaweyn Soomaaliyeed oo kolkaa Ingiriika deggeneydna aad bey ugu kaceen ayaka oo u arkayey inuu faragelin ku sameeyey af Ccarabiga.

*Cali Sugulle Duncarbeed*[3] oo ka warramayey mahadhada *Muuse Galaal* gaar ahaan halka uu dhaqanka ka taagnaa waxa uu yidhi, "Kolka aroortii nala ciyaarsiinayo jimicsiga, waxa uu na odhan jirey: Waar ciyaar Soomaaliduba waa jimicsi oo iyadaaba ka fiicane ciyaara."

Dad badan ayaa rumaysan inaanu *Muuse* wax gacanqabasho ah ka helin dawladihii Soomaaliyeed ee dalka soo maray si uu halgankii uu ku jirey uga midho dhaliyo. *Cali Sugulle* oo arrintaa ka warramayey waxa uu si gaara farta ugu goday maammulkii Maxamed Siyaad Barre. Waxaanu yidhi, "iskadaa wax uu u qabatoo waxa uu u diidey warqaaddii oggalaanshaha ee debedda loogu

saari lahaa." Maalin tii la bud dhigayna waxa uu ka tiryey gabaygan :

*GEERIDU XAQ WEEYOO HORAA, LOO GARWAAQSADAY*
*GEYIGII ILAAHAY HADDUU, MAWDKI KUGU GAADAY*
*WAA GOOBTUU NEBIGII KU DILAY, OO GUNAANADAN*
*GALLAD EEBBE MEYDKAAGIIYUU , SOO GADAAL CELIYEY*
*GURIGA HOOYO AASKAAGU, WAA GALABSIGAAGII*
*WAA GAAR AHAAN IYO XASUUS, MUUNAD GOONNIYA*
*WAANA GUUD AHAAN IYO XUSAAN, ABID GABOOBEYNE*
*GIDDIGEED ADDUUNYADA INTII GEESI LAGU FAANAY*
*GOCASHO IYO MAGAC BAA KA HADHA, GOBI U AYDAAYE*
*WAAD GUDATAY MUUSOW XILKII KULA GUDBOONAAYE*
*GUUSHII IFKIYO AAKHRABA LAGU GUDDOONSIIYE*
*GOLDOLOOLADEENNII KUWII KULA GUFEYNWAAYEY*
*EE NOLOSHA KUGU GABAY AYAA TAAGAN GOONYAHA*
*MARKAAD GUURTAY BEY LEEYIHIIN INA GALAALOWE*
*HADDII GEEL ILMIHIISA KORSADO, GOBINA MEECAADDO*
*GABADHII KU MAAHMAAHDAY WAA GAARI LA HUBAA*
*MAR HADDAANAD GEERIDA HORTEED GEESIGA AQOONSAN*
*GOBLAN WEEYE SOOMAALIYEEY GARASHADAADII!!*
..................................................................................
..................................................................................

Geeridii ka dib aqoonyahanno Maraykan ah ayaa alkumay abaal marin lagu magacaabay Muuse Galaal. Taasi oo gu' kasta la siiyo ciddii mutaysata. Waxa kale oo Abwaanka lagu maamuusay buugga la yidhaa "*Magac bilaash uma baxo*." Dhanka internetka waxa jira ardaa lagu magacaabo Muuse Galaal oo sumaddiisu tahay: ***http://www.muusegalaal.com***

Ugu dambayntii waxaannu ku soo gabagabayneynaa qoraalkani maansada la yidhaa '***Galaal'*** ee uu tiriyey *Maxamed Ibraahim Warsame "Hadraawi"*. Waxaanu yidhi :

*Googgaa libaaxow*
*gaaddadaada dhiiggiyo*
*xinjiraha galshaystee*
*gaasheeyey laabtiyo*
*gocomada da 'aayiyo*
*waa maxay galdhiidhigu*
*yaa fallaadha kugu ganay?*

*Waa maxay gabiibtiyo*
*gegidiyo dabayshiyo*
*dhaxanta iyo gawdhaha*
*gabayooxa dhacayaa*
*geriyaadkan maadaa*
*gawdiida keligaa?*

*Wuxu yidhi "gabboodkiyo*
*hadh galbeedka iijiid*
*soo gaabi toyashada*
*hadalkana i gees mari*
*goobtana wax weyddii".*
*Waxan idhi, "gubtahanyada*
*maxaad uga gol leedahay?"*
*Wuxu yidhi, "miyaan gabay*
*wixii ila gudboonaa*
*maanigaa gabaabsiyey*
*gudan waayey taydii*

*mise gumaradaydiyo*
*giddi habar dugaag baa*
*libta geesigoodiyo*
*tira guulihiisoo*
*gantaday u siibaan*
*geedkay hadhsanayaan?"*
*Waxan idhi, "miyaad garan*
*waxa goobtan kugu furay?"*
*Wuxu yidhi, "guddoonsadey*
*saymaha go'doonka ah*
*gocashaase igu maqan."*

*Waxan idhi "ka soo gudub*
*gooraanka taahoo*
*ka gadaal sarbeebtaas*

*warka aan Galaalow*
*googoos ka dhigannoo*
*is la sii gorfaynoo*
*sii gaasa bixinnee,*
*guul guulka kugu dhacay*
*haddaad mooddey gaadmiyo*
*kamma' uu wed geystiyo*
*wax ka yimi garaad li'i*
*gaban iyo falaadkii*
*haaway is guratiyo*
*nacab iyo giniis iyo*
*hadhadii gumestiyo*
*intii gaalku reebaa*
*shilka wada gorfaysoo*
*nabarrada ku gaadhiyo*
*gawl gawlka xagashada*
*waa laguu guddoonshee,*
*haddaad geesi leedahay*
*maxaa lay gu gaasiray?*
*Garta anigu maan niqin*
*taladana wax kama goyn*
*godobtana wax kuma lihi."*

*"Anaa goobta joogoo*
*waxa dhacay guntaayee*
*kuma gabin bahdaadii*
*bulshadaadu kuma goyn."*
*"Geeridaadi sawtii*
*gobollada dalkoo idil*
*dadku wada gadoodee*
*la gilgiley fallaagada."*

*"Waxa Deeqa* lagu galay*
*ama gaadhey awgaa*
*ma ogtahay Galaalow? "*

*"Gabadhaada sawtii*
*gooheeda yeedhiyo*
*guubaabadeedii*
*galowgii ku sara kacay!"*

*"Gabadhaadu sawtii*
*garbasaarta xoortee*
*ganbadii ka carartee*
*marta sare u guratee*
*saqdadhexe gadoodiga*
*gacan dhiigla-yaashii*
*ku garaacday aqallada.*

*Sawtii la gawdhshee*
*seefaha gardiidka ah*
*galka lagala soo baxay."*

*"Gabadhaadu sawtii*
*gumucyada rasaasta ah*
*warankiyo gamuunkii*
*hadh cad lagugu soo ganay*
*u daruurtay gaashaan."*
*"Gabadhaada sawtii*
*iyadoon Galaa low*
*u gargaariddaadiyo*
*gurmadkaaga mooyee*
*gefkaleeto loo hayn*
*garka lagu muquunshee*
*xilka laga guddoontee*
*cidla' lagu galaaftee*
*lagu goobtay keligeed."*

*"Gabadhaada sawtii*
*ilmadii ka gabax tidhi*
*naxashkaad Galaalow*
*gudihiisa jiiftiyo*

*kafantii ku gobo tidhi."*

*"Hibashada guhaaddiyo*
*gedgeddoonka ciilkiyo*
*goroddaad lulaysaa*
*kugu gooni maahee*
*waxa kula gudboon taas*
*gobannimada ciirtiyo*
*qarannimada guurtiyo*
*himilada gablooshiyo*
*danta gebi dhacaysiyo*
*runta galan galcawdoo*
*geba geba is dhaafiyo*
*guri laga baroortiyo*
*naf gunaanad weydiyo*
*guurti cayn wareegtiyo*
*gebi ruqa sidaadiyo*
*immisaa gulcubo dhacay*
*geeskeennu Muusow*
*immisuu gurracan iyo*
*gudcur soo hawaariyo*
*gabbaldumey u taagnaa?"*

*"Haddaad geesi leedahay*
*maa la ii abaal gudo*
*horta yaa qalaalow*
*geesoole geel baray?"*

*"Goormaad ogsooneyd*
*dawac gooddi joogiyo*
*wan baruuri goobtoo*
*gacalnimo ku wada nool?"*

*"Goormaad ogsoonayd*
*gendigiyo dhukaankiyo*
*guudaanka cudurkiyo*
*gawracato raacdoo*
*geel bukooday lagu dhayo?"*

*"Goormaad ogsoonayd*
*faras gedaha duullaan*
*gurmashada ku caan baxay*
*iyo geeddigii dheer*
*baqal aan geyoonoo*
*guluf qudha ku wada jira?"*

*"Goormaad ogsoonayd*
*goonbaarta dumarkoo*
*gaarida haweenka ah*
*garab siisa Muusow"?*

*"Goormaad ogsoonayd*
*giiryaale fulaygoo*
*weheshada nin geesiya?"*

*"Ma ogtahay Galaalow*
*waxa lagugu gaasiray*
*goldaloolo maahee*
*waa geyfanaantiyo*
*gudashada xilkaagoo*
*guumeys masayrtoo*
*gumartiyo dharkaynkiyo*
*garaska iyo boocdiyo*
*gocondhada wax saydhiyo*
*gommoshaaga jeceloo*
*dhebigiyo galoolkiyo*
*gobka iyo madheedhkiyo*
*inta geed san neceboo*
*dhirta gaara ximisaa*
*kugu soo galgalatee*
*ha ka guban tummaatida*
*hana gocan abwaankow*
*haw dudin Galaalow*
*dhidar meydka daba gura!"*

*"Galab qudha nin noolaa*
*galabtiina Muusow*
*gashi iyo dadkiisii*
*gacmo qaawan kala tegey*
*wuxu galabsadaa yaal*
*murugada gadhoodhka ah*
*ninkii gaaxsadaa shuban."*

*Godku wuxu canaantaa*
*ama gogol ku ciilaa*
*go 'a qudha ka diirtaa*
*ama badi guhaadshaa*
*hadba giir u kiciyaa*

*gaafaha ku laastaa*
*geesaha kufeedhaa*
*gibilkooda loogaa*
*gungumaha ku sooraa*
*giiryaala-yaashoo*
*goblan baa xijaabtee*
*miyuu geesi hoydaa*
*garashadu wed leedahay?*
*Damalyohow gardhaystee*
*laamaha gandoodiyo*
*hoobaanta ganacda leh*
*guudkiisa saaree*
*dabadeed gilgilashada*
*garangarinta laafyaha*
*galaxyada casuusta ah*
*gaankiisa hoosiyo*
*inta gaararkiisiyo*
*gartallawga buuxshee*
*dhulka wada guduudow*
*gedo iyo fac labadaba*
*ummad kala gu'weynoo*
*galab noolba joogtaa,*
*midhahaaga guratoo*
*nin gardaadshey maamuus*
*ummaddiisa guul iyo*
*gallad waarta kaga tegey*
*gebigeed adduunyada*
*afarteeda geesood*
*Si kastaw galaa baxay*
*geyigoo dhan joogoo*
*guryahoo dhan yaallaa*
*miyuu geeri leeyahay*
*hilbihiisa goodkiyo*
*dulin gaajo haysiyo*
*miyay ciiddu geydaa?*

*Ha la gabo xilkaagee*
*horta yaa Galaalow*
*magacaaga gadi kara*
*guulahaaga qarin kara*
*kutubtaada gubi kara?*
*Goodaaddo la hantiyo*
*inta gaabinaysee*
*dadka gaws danbeedkiyo*
*gabbashada ku laysiyo*
*fule lagu gabraartaa*
*golxobbada ha ramiyeen*
*ninka raga ha gaadeen.*
*Reer guura raaciyo*
*inta golon gol Muusow*
*is gamaarinaysaa*
*filanwaa ha geysteen*
*gamasyada shirqoolka ah*
*ha la soo gurguurteen*
*nin gurrani ha kula dhaco*
*afgammuurta liicdiyo*
*rawisaha galoofta ah,*
*Taariikhdu waa guun*
*qorrax aan gaboobayn,*
*ma gedmaan ayaamuhu*
*giiryaale weligii*
*ha gilgilo salkaagee*
*gondahaaga hoosuu*
*ku gataati ciiree*
*aaway ina Galaalow*
*gacantii ku ridi layd*
*gudintii kujari layd?*

*Ummad goba hankeediyo*
*gunnadii dadkaagiyo*
*gaadh baa ku weheshee*
*miyuu kaa gol roon yahay*
*guuguule kugu ciyey?*

*Nin kastaa ha gooddiyo*
*gocorradu ha doobyeen,*
*godadliyo hinaasaha*
*waxad kaga gam 'aysaa*
*runtu waa Galaalow,*
*murti garangarteediyo*
*goobaha tixraaca leh*
*haddii maanso loo guro*
*guddigeeda khaaska ah*
*gola jooga maantaas*
*adigaa guddoonsha ah.*
*Suugaanta guunka ah*
*afgobaadsi geediyo*
*gaal gaalka jiiftada*

*godka hoga tusaalaha*
*ninka gawda baanaha*
*gaawaha hayaad tahay.*

*Hawraar gahaydhiyo*
*maahmaah go'xidhatiyo*
*gololada sarbeebta ah*
*halka ay ku gorortiyo*
*godankiyo ishaad tahay.*

*Geeraar ka-hadalkii*
*gabay iyo ab-tirintii*
*jirridiyo guntaad tahay.*

*Gaadiidka dhaqankiyo*
*gurgurshaaga heesaha*
*garka lagu daleeyiyo*
*gibishiyo figtaad tahay.*

*Goobaha aftahammada*
*guga doogsintiisiyo*
*gudgudaa hillaaciyo*
*guulaamo caratiyo*
*galal buuxsamaad tahay*
*Gudcurkiyo habeenkii*
*saadaasha guudkiyo*
*godadkiyo xiddigiskana*
*dayaxoo galshaystiyo*
*gabbalaha cirkaad tahay.*

*Geba gebada sheekada*
*hambalyada Galaalow*
*waxan kugu gelbinayaa*
*marti soorka gacalkiyo*
*geenyadii abaalkiyo*
*mahad aan gaboobayn.*

*Guntigaagu waa sharaf*
*goonyahaagu waa nuur*
*gogoshaadu waa nabad*
*guushana dadkayska leh*
*dalka geesigiisiyo*
*galladdana adaa mudan.*

*Raadraac*

- [1] Prof. B.W. Andrzejewski. "Muuse Xaaji Ismaaciil Galaal: a founding father of written Somali," Horn of Africa, No. 2, Vol. 4

- [2] Lee Nichols. Conversations with African writers , Voice of America. Washington, D.C., 1981.

- [3] Cali Sugulle Duncarbeed. " Xus iyo Xasuus," video tape, Abu Dabi

- [4] M.I.Warsame"Hadraawi". "Hal-karaan," Norway, 1993.

*Deeqa Col-u-joog waxay dagaal u gashay sidii Muuse loo daweyn lahaa ee debedda loogu saarilahaa.